

Gudhman (masuulka sharciga) ama maareeye

Maxkamada ayaa qofka u habeynaysa gudhman ama maareeye. Qofku waxa uu heli karaa gudhmanka ama maareeyaha marka aanu isagu iskii maamuli karin naftiisa ama waxa uu leeyahay.

Qofka leh gudhman ama maareeye waxa loo yaqaanaa loo adeegaha. Waxa jira faraq muhiim ah oo u dhaxeeya gudhman iyo maareeye. Gudhmanku waxa uu loo adeegaha ka caawiyaa sidii uu u maamuli lahaa dhaqaalihiiisa iyo sida uu u sameyn lahaa doorashada waxyaalaha muhiimka ah ee noloshiisa saameeya. Gudhmanku waa inuu markasta eegaa waxa uu loo adeegahu uu rabo. Maareeyahu waxa uu kaligii go'aamin karaa lacagta loo adeegaha isaga oo aan loo adeeguhu haa odhan.

Dalabka

Dalabka gudhmanka ayuu qofku kaligii ka sameysan karaa maxkamada degmada. Xataa dadka qaraabada ah ama gudiga masuulka sare ayaa u soo qori karta dalab gudhmanka ama maareeye. Haddii aad caawimo dalabka ah rabto ayaad la soo hadli kartaa waaxda masuuliyada sare ee Linköping.

Kharashka

Haddii aad wax ka badan 117 600 kr sanadkii shaqeysato ama aad leedahay hanti ayaad bixinaysaa gunnadda gudhmankaaga ama maareeyahaaga. Gunnadu waxa weeye ugu dhawaan 12 000 karoon sanadkii.

Waxan ahay tahay inuu gudhman ama maareeye sameeyo

Gudhmanka ama maareeye waa inuu hubiyo inuu adeegahu waxa uu xaqa u leeyahay uu helo. Taasi waxay tusaale ahaan noqon kartaa waxa ku sabsan deeqda iyo waxqabadka uu qofku xaqa u leeyahay, iyadoo uu goob joog ka ahaado marka

dhaxalka la qeybinaayo ama uu u dalbo in deyndhaaf loo sameeyo. Gudhmanka ama maareeyeyaha waa inuu ilaaliyo inuu loo adeegaha uu helo kaalmada loo ogolaadey.

Gudiga masuuliyada sare

Gudiga masuuliyada sare waxay kantaroshaa waxa uu gudhmaanka ama maareeyahu uu qabanaayo. Gudhmanka ama maareeye ayaa la soo baadhaa intaanay shaqada bilaabin. Waxyaalaha qaarkood ayaa u baahan inuu gudhmanku weydiiyo gudiga masuuliyada sare ka hor inta aanay sameynin. Taas waxa tusaale ahaan ka mid ah haddii uu gudhmanku ama maareeyuhu oo iibinaayo sheerar, guri uu iibinaayo ama wax uu leeyahay loo adeegaha.

Marka ay shaqada istaagto

Shaqada in la ahaado gudhman ama maareeye ayaa istaag karta haddii go'aan maxkamada ama gudiga masuuliyada sare soo saarto. Haddii uu loo adeegaha dhinto ayay shaqadu istaageysaa maalintaa uu geeryooday. Gudhmanka ama maareeye ayaa isagu dalban kara inuu shaqada iska joojiyo laakiin waa inuu sii shaqeeyo ilaa inta ay gudiga masuuliyada sare helayso gudhman ama maareeye cusub.

Sir dhowrista

Loo adeeguhu waxa uu markasta xaq u leeyahay inuu arko wixii qoraalo ah ee isaga khuseeya. Xataa loo adeegaha xaaskiisa ama qofka la nool iyo dadka qaraabda ee ugu dhowdhow ayaa xaq u leh inay arkaan waxa khuseeya loo adeegaha.

Kala soo xidhiidh xafiiska mas'uulka guud iyo gudiga

Cinwaanka boostada: Linköpings kommun
Överförmyndarenheten Linköping
581 81 Linköping

Cinwaanka booqashada: St:Larsgatan 41

Telefoonka: 013-20 69 99.

Bogga internetka: www.linkoping.se

Emaylka: overformyndarenheten@linkoping.se